

Cudurada Meningococcal iyo HPV

Waalidka iyo Wakiilada Qaaliga ah:

Waalidahaan, waxaa aad inoogu muhimsan daryeelka caafimaadka ubadkayna. Sharci-dajiyasha Gobolka Washington waxay naga rabaan in aynu ku siino akhbaaraha ku saabsan cudurada meningococcal disease iyo human papillomavirus (HPV). Garashada xaqiqliqda oo ku saabsan cuduradaan iyo helitaanka talaalka si ubadkaada looga difaaco cudurkaan.

Cudurka Meningococcal Disease iyo habka ka-hortaga

Muxuu yahay cudurka meningococcal disease?

Cudurka Meningococcal disease waa cudur faaf oo keeno bakteeriyyada. Nasiib wanaag, ma'ah cudur halis u ah nolosha inta badan, warbixinta waxay tilmaantay 20-50 kays sanadkiiba gobolka Washington. Calaamadaha cudurkaan lagu yaqaano waxaa ka mid ah xumad, qufac, madax-xanuun iyo kor-cuncun. Waxaa kaloo cudurka meningitis keeni karaa (barar ku yimaado maskaxda iyo laf-dhabarka). Cudurka wuxuu ku faafi karaa xariir la sameeynta qofka cudurka qabo. Cudurka meningococcal disease wuxuu aad ugu dhacaal dhalinyarada iyo caruurta gaar ahaan goobaha dadka faraha badan ku noolyihiin sida kuleejjooyinka lagu hooydo.

Sidee baa ugu difaaci karaa ubadkayga cudurkaan meningococcal disease?

Talaalka cudurka meningococcal, ama MCV4, waxaa looga hortagi karaa afar nooc cudurkaan. Waxaa talo lagu bixiyey in la talaalo dhamaan caruurta u dhaxeeeyso 11 iyo 12 sano jirka iyo waqtii kale 16 to 18 sano jirka.

Goobtee baa ka helayaa talaalka cudurka meningococcal?

La hadal takhtarkaada, kaaliyaha caafimaadka, ama hay'adda caafimaadka deegaankaada si aad u barato cudurkaan. Gobolka Washington wuxuu bixiyaa talaal bilaash ah caruurta yar ilaa 18 sano jirka. Bixiyaasha caafimaadka waxaa loo maleeyaa qarash in ay kugu soo dalacaan booqashada si ay kuu siiyaano talaalka. Dadka awooda u laheeyn qarash bixinta waxay weydiisan karaa in laga cafiyo ama laga tanaasula qarashka.

Akhbaaro dheeraad ah oo ku saabsan cudurka meningococcal iyo habka aad uga hortagayso cudurka?

- Washington State Department of Health
www.doh.wa.gov/YouandYourFamily/Immunization/Diseases/MeningitisMeningococcalDisease.aspx
- Centers for Disease Control and Prevention
www.cdc.gov/vaccines/hcp/vis/vis-statements/mening.html
- Children's Hospital of Philadelphia Vaccine Education Center
<http://prod-www.chop.edu/conditions-diseases/meningococcal-infections>

Cudurka human Papillomavirus (HPV) iyo ka-hortagiisa

Muxuu yahay cudurka HPV disease?

HPV waa cudur keeno Feeruska caadiiga ah. Inta badan dadka oo ku dhaco cudurkaan HVP wax dhibaato caafimaad ah lama kulmaan laakiin Dadka qaarkood wuxuu cudurka u keeni karaa dhibaato caafimaad oo ka mid ah: kansarka ilma-galeenka, dabada, halboolayaasha, afka iyo dhuunta. Inta badan qofka cudurka qabo ma'laho calaamad lagu garto wuuna faafin karaa cudurkaan. Cudurka waxaa lagu kala qaadaa galmada.

Sidee baa ugu difaaci karaa ubadkayga cudurkaan HPV?

Hubi in ubadkaada oo helo talaalka HVP. Talaalko wuxuu leeyahay wax-tar aad u fiican. Waqtiga ugu fiican oo talaalka la qaato waxay tahay ka-hor ubadka inta uusan qaan-gaarin. Talaalka cudurka HPV wuxuu ka-hortagayaa ku dhicitaanka cudurka iyo halista cudurka u keeni karo kansarka xubnaha taranka. Talaalka qofka cudurka HVP qabo waxba uma taraayo.

Qofkee la siinaya talaalka iyo goormaa oo qaadanayaa talaalka?

Seddex talaal HVP waa in la siiyaa dhamaan wiilasha iyo gabdhaha da'dooda tahay 11 ilaa 12 jirka. Waxaa fiican talaalka ay qaataan haweenka ilaa da'dooda tahay 26 jir raggana ilaa 21 jir. Intaa waxaa dheeraad ka ah talaalka HVP, caruurta jirta 11 ilaa 12 sano ay qaataan talaalada Tdap iyo meningococcal vaccines.

Goobtee baa ka helayaa talaalka cudurka HPV?

Weydiiso takhtarkaada, kaaliyaha caafimaadka, ama hay'adda caafimaadka deegaankaada arimaha talaaka iyo goobaha aad ka helayso.

Akhbaaro dheeraad cudurka HPV, talaalka, iyo kansarka ilma-galeeynka:

- Washington State Department of Health
www.doh.wa.gov/Portals/1/Documents/Pubs/348-187_HumanPapillomavirusVaccineFactsheet.pdf
- Centers for Disease Control & Prevention
www.cdc.gov/std/hpv/
- American Cancer Society
www.cancer.org